# WAXAAD LEEDAHAY XUQUUQDA GURIYAYNTA:

## WAXA AAD SAMAYNAYSO HADDII AAD HESHO OGEYSIISKA GURI KA SAARIDDA

**La xiriir si aad u hesho caawimaad sida ugu dhakhsaha badan ee aad hesho ogeysiiska guri ka saaridda (Ogeysiiska Guurista) ama wakhti kasta oo aad dareemayso cadaadis, amaan daro, ama ka walwalsan tahay luminta gurigaaga. Mulkiilaha gurigaaga ayaa u baahan inuu maxkamad ku geeyo keliya garsoore ayaana amri kara inaad guriga ka guurto.**

## Maxay tahay inaad samayso haddii mulkiilaha gurigaagu kuu sheego inaad guriga ka guurto?

**Mulkiilaha gurigaaga ayaa ku qasban inuu ku siiyo ogeysiiska guri ka saaridda oo qoran marka hore.**

Mulkiilaha gurigaagu kaama saari karo ama ma badeli karo qufullada gurigaaga. Haddii mulkiiluhu rabo inuu guriga kaa saaro, waa in uu kuu keenaa ogeysiiska guri ka saaridda oo waraaq ah (Ogeysiiska Guurista) uuna ku geeyaa maxkamad.

**Uruurso dhammaan dukumiintiyadaada oo la xiriir caawimaad isla markaba!**

La xiriir ururka kaalmada sharciga si aad u ogaato xuquuqdaada. Wac Maine Equal Justice, Pine Tree Legal Assistance ama kooxaha guriyaynta ee maxaliga ah sida ugu dhakhsaha badan marka aad hesho ogeysiis. Meel dhigo heshiiskaaga kirada iyo ogeysiis kasta iyo warqadda aad ka hesho mulkiilaha gurigaaga. Waad u baahan doontaa haddii aad gasho maxkamad.

## Waa maxay xuquuqdaada gudaha maxkamada?

**Waxaad xaq u leedahay dhageysi.**

Keliya garsoore ayaa go'aamin kara haddii ay qasab tahay inaad guurto. Waa sharci daro in mulkiilaha gruigaagu kaa xirto guriga ama kaa tuuro alaabahaaga ayadoo aysan maxkamad amrin. Waa in aad soo xaadirtaa maxkamadda.

**Waxaad codsan kartaa turjumaan.**

Maxkamadaadu waa inay ku siisaa turjumaan haddii aad u baahan tahay. Wac maxkamadda ama tag xafiiska karaaniga si aad ugu sheegto in aad u baahan tahay turjumaan. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa garsooraha maxkamadda!

## Goorma ayay tahay inaad guriga ka guurto?

**Keliya marka booliisku kaa saaraan.**

Haddii lagaaga adkaado maxkamadda, mulkiilaha gurigaaga waa in uusan guriga kaa xiran ama tuurin alaabtaada. Haddii lagaa adkaado, 9 maalmood kadib maxkamadda, booliiska ayaa kuu imaan kara kaana dalban kara inaad guurto.

## Xasuusnoow: takoorka guriyayntu waa sharci daro!

**Mulkiilaha gurigu kaama saari karo guriga sabab la xiriirta sirikaaga, qoomiyadaada, wadankaaga hooyo, diintaada, jinsigaaga, galmadaada, qoyskaaga, ama naafo.**

## NALA SOO XIRIIR:

**Iskaan garee koodhka QR ama booqo:**
maineequaljustice.org/contact-us/

Shaqada lagu baxshay aasaaska dabaacadaan waxaa lagu taageeray maalgelinta abaal marinta Waaxda Guriyaynta iyo Hormarinta Magaallada ee Mareykanka (U.S. Department of Housing and Urban Development). Qoraaga iyo daabacaha ayaa si gaar ah masuul uga ah saxnaanta bayaannada iyo turjumaadaha ku jira daabacaadaan. Turjumaadaha noocaas ah ayaan ka turjumayn fikirka Dawlada.

Maine Equal Justice
People Policy Solutions